


# Xulashooyinka awood qeybsi ee nidaamka federaalka Soomaaliya




Somali Public Agenda

November 10, 2022

# Xulashooyinka awood qeybsi ee nidaamka federaalka Soomaaliya

Soomaaliya markii ugu horreysay waxa ay nidaam federaaal si kumeelgaa ah u qaadatay sanadkii 2004. Madaxweynihii ugu horreeyay ee Puntland oo la dhisay sanadkii 1998 ayaa noqday madaxweynihii dowladdii federaalka kumeelgaarka ee lagu dhisay Kenya sanadkii 2004. Kadib sanado badan oo lagu howlanaa qoridda dastuur federaal ah, Dastuurka Federaalka ee Soomaaliya waxa si kumeelgaar ah loo ansixiyey 10 sano kahor 1-dii August

2012. Sanadihii u dhexeeyay 2013 ilaa 2016, ilaa 4 dowlad-goboleed ayaa la dhisay.

Balse arrimo muhiim u ah qabya-tirka dastuurka iyo dhameystirka qaab-dhismeedka federaalka ayaanan weli laga heshiinin oo ay kamid tahay sida awoodaha fulinta loogu qeybnayo heerarka kala duwan ee dowladda.

Dhawaan Somali Dialogue Platform iyo Somali Public Agenda waxa ay wada daabaceen faallo qoto-dheer ee uu cinwaankeedu yahay 'Xulashooyinka awood qeybsi ee nidaamka federaalka Soomaaliya'. Faallada waxa ay soo bandhigtay saddex nooc oo awood qeybsiga loo nidaamin karo.

Podcast-gan waxa aan ku falanqeyneynaa nuxurka warbixinta iyo nooca awood qeybsi ee ku habboon Soomaaliya. Waxaa marti ku ah Maamul Wanaag Podcast **A**xmed Cabaas (Gacma-gaab) oo ah la taliyaha arrimaha federaalka ee madaxweyne Xasan Sheekh iyo Abukaate Cumar Maxamed Cabdulle (Dhagey) oo la taliye sare arrimaha talinta sharciga (rule of law) ee xafiiska Raysal Wasaaraha.

**Click here to listen the podcast on Apple Podcasts, Google Podcastsand Amazon Music.**

Share This :

## Leave a Reply

Your email address will not be published. Required fields are marked *

Comment *

Name *

Email *

Website

Xulashooyinka awood qeybsi ee nidaamka federaalka Soomaaliya

Post Comment

Δ

## Recent Posts

- 


  08 Sep 2025
  E.37 Adeegyada Xalka Waara iyo Horumarinta Reer Miyiga

- 


  05 Sep 2025
  E.57 Heshiiska Dowladda Federaalka iyo Qeyb Kamid ah Madasha Samatabixinta

Xulashooyinka awood qeybsi ee nidaamka federaalka Soomaaliya

- 

31 Aug 2025
Daahfurka SPA Polls ee Somali Public Agenda

## Follow Us

Icon-facebook Instagram

Twitter Linkedin

Youtube